

FOUNDATION FOR BLACK COMMUNITIES

# HAGAHA CODSADAHA

## DEEQDA BLACK IDEAS GRANT (B.I.G) 2.0

2024

Funded in part by the Government of Canada's Black-Led Philanthropic Endowment Fund

Canada

FOUNDATION FOR BLACK COMMUNITIES

# Tusmada


Xog ku saabsan Foundation for Black Communities 2
Deeqda Black Ideas Grant 2.0, 2024 3
Habraacayaga 4
U-qalmitaanka 4
Hindisayaasha u-qalmitaanka 4
Ururada aan u-qalmin 6
Waxqabadyada Guud ee u-qalmitaan la'aanta 7
Agabaynta Bulshooyinka Madow 8
Deeqo Bixinaha 8
Deeqda Stream Core | ilaa $30,000 8
Deeqda Stream Katapult | ilaa $80,000 11
Deeqda Community Spaces Stream | ilaa $200,000 14
Geedi-Socodka Xulashada 17
Wareegyada Xulashada Bulshada 18
Shuruudaha Xulashada 18
Shuruudaha Warbixinta 19
Habka Codsashada 20
Jadwalka Wakhtiga




Funded in part by the Government of Canada's Black-Led Philanthropic Endowment Fund | Canada

# Xog ku Saabsan Foundation for Black Communities

*Bulshooyinka madow waxay dalbanayeen hab cusub oo samafal ah. The Foundation for Black Communities (FFBC) waxaa loo aasaasay si ay uga jawaabto una fuliso baaqan iyo in ay hubiso in dhammaan dadka madow iyo bulshooyinku ay horumaraan oo ay yeeshaan hay'ad qeexaysa mustaqbalkooda. Waxaa la aasaasay 2020 iyada oo ujeedadeedu tahay in la beddelo bulshooyinka, FFBC waa hay'ad samafal Kanadiyaan ah oo loogu talogalay hubinta in hay'adaha U Xilsaaran-Madawga, Hogaamiyaan-Madowgu iyo kuwa u Adeega-madawgu ay helaan adeegayda iyo agabka joogtada ah ee ay u baahanyihiin si ay u sameeyaan saameyn macno leh.*

# Deeqda Black Ideas Grant 2.0, 2024

Deeqda Black Ideas Grant 2.0, 2024 ee FFBC, waa maalgelin balaadhan oo dhan $9.5 milyan si loo aqoonsado loona taageero dadaallada ku wajahan hindisayaasha xallinta ee ay hogaaminayaan bulshooyinka Madow ee Kanada. Barnaamijkani waxa uu maalgalin doonaa baahiyaha degdega ah iyo kuwa taagan ee qaar ka mid ah bulshooyinka Madow, sidoo kale waxa uu soo saari doonaa aragtiyo qiimo leh oo ku saabsan barnaamijyada la maalgelin karo mustaqbalka.

Deeqdani waxa ay bixisaa maalgalin dabacsan oo hal sano ah si loo kordhiyo awooda hay'adaha samafalka iyo kuwa aan faa'iido doonka ahayn ee U Xilsaaran-Madawga, Hogaamiyaan-Madowgu iyo kuwa u Adeega-madawga si ay ula dagaallamaan midab-takoorka madowga iyo hagaajinta natiijooyinka bulsho iyo dhaqaale ee bulshooyinka Madow. .

**Codsiyadu waxay furmayaan Oktoobar 1, 2024, waana in la soo gudbiyaa ka hor Noofambar 8-deeda, 2024, saacada 11:59 PM PT.**

# Habraacayaga

FFBC waa hay'ad nooceeda ah tii ugu horraysay, hadafkayagu waa inaan fahanno, aqoonsanno oo aan xusno xal-u-samaynta bulshooyinka Madowga ah. Laakiin marka hore, waa in aan eegno bulshooyinka si ay gacan uga geystaan wargelinta deeqaha iyo barnaamijyada mustaqbalka soo socda. Waxaan u baahanahay codka iyo khibradda dhammaan dadka Madowga ah. FFBC waxa ay xooga saartaa muhiimada bulshada, iyada oo aaminsan in aan dhamaanteen isku xidhan nahay. Marka aynu hagaajino xaaladaha kuwa inagu xeeran, waxaan sidoo kale hagaajineynaa xaaladaha nafteena.

Habkani wuxuu xooga saarayaa aqoonta, hal-abuurka, khibradaha, iyo fikradaha kuwa ugu dhow natiijada la rabo ee barnaamijka. Dhammaan codsiyada waxaa dib u eegi doona xubno ka tirsan bulshada Madowga. Taasi oo keenaysa kalsooni, cadaalad iyo wakaalad taas oo xuddun u noqonaysa falsafadayada, sidoo kale FFBC waxay isticmaashaa habraacan si ay u dhalan rogto oo ay u dimuqraadiyeyso samafalka.



Funded in part by the
Government of Canada's Black-Led
Philanthropic Endowment Fund | Canada

FFBC waxay sidoo kale aqoonsan tahay inay jirto shaqo taariikhi ah oo muhiim ah oo ku saabsan taageerada bulshooyinka ee caqabadaha soo wajaha ee ugu sarreeya iyo galaangalkooda ugu yar ee helitaanka deeqaha maalgelinta caddaaladda, cimilada, caddaaladda naafada iyo caddaaladda jinsiga. Kuwaas waxaa ka mid ah 2SGBTQI+, haween iyo gabdho, xubnaha jinsigooda beddelay ee bulshada, kuwa dakhligoodu hooseeyo, kuwa naafada ah, kuwa dhagoolada ah, kuwa ku cusub waddanka, tahriibayaasha, kuwa horey u xirnaan jirey iyo kuwa aan cuntada haysan. FFBC waxaa ka go'an in ay taageerto dhinacyadoo dhan, dulmi-diidka, gumeysi-diidka, iyadoo raacaysa habraacyo ku salaysan cadaalad isku xidha oo dhista mustaqbal kaas oo dhammaan bulshooyinka Madow ay ku koraan.

BIG 2.0, 2024 waxa qaabeeyey talo-wadaag bulsho. Si kastaba ha ahaatee, waxaanu aqoonsanahay in tani ay tahay geedi socod weli socda, waxaanan rajaynaynaa inaanu horumarino hindise-maalgelineedyo mustaqbalka kuwaas oo ku salaysan aaraada laga heli doono wareeggan labaad ee maalgelinta.



Funded in part by the Government of Canada's Black-Led Philanthropic Endowment Fund | Canada

# U qalmitaanka

Kaliya ururada u qalma ayaa soo codsan kara Deeqaha Black Ideas Grant 2.0, 2024. Si aad ugu qalanto, ururadu waa inay:

- **Noqdaan kuwo uu Qof Madow-Hogaamiyo, U Xilsaaran-Madowga, iyo kuwa U Adeega-Madowga (B3)**
  - ◊ **Urur uu Madow-Hogaamiyo:** Ururadan ugu horreyn waxa hogaamiya oo maamula shakhsiyaad Madow ah. Ugu yaraan 2/3 hoggaankooda, oo ay ka mid yihiin kooxdooda fulinta iyo guddiga agaasinku, waa inay ahaadaan madow. Hoggaamintooda halkani waxa ay muujinaysa in go'aamada, siyaasadaha, iyo jihaynta istaraatiijiyadeed ay ka tarjumayaan waayo aragnimadooda nololeed iyo mudnaanta dadka Madow.
  - ◊ **Urur U-xilsaaran-Madowga**: Ururadani waxay si joogto ah ugu adeegaan bulshooyinka Madowga ah, iyagoo wax ka qabanaya xaaladaha iyo bixinta adeegyada la xidhiidha dadka Madowga ah. Barnaamijyadooda iyo hindisayaashooda waxaa loogu talagalay in ay wax ka qabtaan caqabadaha sida aan habboonayn u saameeya bulshooyinka Madow.
  - ◊ **Urur U-adeega-Madowga:**Ururadan Adeegyadooda, taageeradooda iyo agabkoodaba waxa loo qaabeeyey oo loogu talogalay inay taageeraan bulshooyinka Madowga ah, iyagoo hubinaya in adeegyadooda iyo barnaamijyadoodu ay daboolayaan baahiyaha shakhsiyaadka Madowga ah, xitaa haddii ka-faa'iidaystayaasha adeeggooda ay ka mid yihiin kooxo kale.

- **Noqo hay'ad samafal oo diiwaangashan, mid aan faa'iido doon ahayn oo ka madaxbanaan lahaanshiyo, ama urur aan faa'iido doon ahayn oo la leeyahay ama koox la shaqaynaysa cid madax banaan oo aan lahaanshiyo lahayn.** Kooxaha aan lahaanshiyaha lahayn waxaa ka mid noqon kara iskaashatooyinka madowga, Ururada Ardayda, Kooxaha Isku-fakarka ah, iwm.

- **In aad ku dhaqantahay guddaha Kanada.**

## Hindisiyaasha U-Qalmitaanka

Marka aad buuxinayso codsigaaga, waxaad haysan doontaa fursad aad nagula wadaagto hindisaha aad soo jeedinayso. Kaliya hindisiyaasha u qalma ayaa heli doona fursad ay ku helaan maalgelin. Si aad ugu qalanto, hindisiyaashaadu waa inay:

- **Wax ka qabanayaan ugu yaraan mid ka mid ah saddexda Qodob ee diiradda la saaray**: La-dagaalanka midab-takoorka Madowga, Horumarinta natiijooyinka bulshada iyo horumarinta natiijooyinka dhaqaale.

- **Wax ka qabanayaan mid ama in ka badan oo ka mid ah Yoolalka Go'aaminta Bulshada iyo Go'aamiyayaasha Bulsheed ee Caafimaadka.**



Funded in part by the Government of Canada's Black-Led Philanthropic Endowment Fund | Canada

- **Lagu fulin karo wakhtiga la asteeyay iyo maalgelinta la hayo**, iyadoo la hubinayo in dhaqaalaha la isticmaalo ka hor March 31, 2026.

- **Aanay ku jirin mid ka mid ah hawlaha u-qalmitaanka burinaya ee hoos lagu qeexay.**

    ◊ **Ururada la leeyahay ee aan Faa'iido-Doonka ahayn, Iskaashatooyinka iyo Kooxaha:** Ururada la leeyahay ee aan faa'iido doonka ahayn, iskaashatooyinka iyo kooxuhu waa inay iskaashi la sameeyaan ururada aan la lahayn ee aan faa'iido doonka ahayn iyo kuwa samafalka si ay u helaan maalgelinta FFBC. Haddii ururkaagu aanu lahayn shuraako lahaanshiyo la'aan ah wakhtiga codsigaaga, uma qalmi doontid maalgelin. Fadlan ogsoonow in FFBC ay u baahan doonto heshiis iskaashi oo u dhexeeya ururada la leeyahay ee aan faa'iido doonka ahayn ama kooxda iyo shariigooda aan lahaanshiyaha lahayn, kaas oo qeexaya faahfaahinta iyo ujeedada iskaashiga.

Haddii aad hayso su'aalo dheeraad ah oo ku saabsan u-qalmitaankaaga, fadlan la xiriir Grants@forblackcommunities.org .

## Ururada Aan U-qalmin

Ururada soo socdaa uma qalmaan maalgelin:

- Ururada aan U Xilsaarnayn-Madowga, Madowgu-Hogaamin, iyo kuwa aan U Adeegin-Madowga;

- Ururada macaash-doonka ah ama shirkadaha;

- Shakhsiyaadka;

- Hay'adaha ganacsiga, oo ay ku jiraan ururada ganacsiga, rugaha ganacsiga iyo ururada guryaha iskaashatada ah;

- Gobolada/Maamulada, oo ay ku jiraan isbitaalada, xarumaha caafimaadka , dugsiyada, dugsiyada gaarka loo leeyahay, jaamacadaha, kulliyadaha, maamulada caafimaadka, maamulada caafimaadka dadweynaha, machadyada waxbarashada, iyo xarumaha adeegyada caafimaadka/bulshada ;

- Dawladdaha hoose iyo hay'adaha ay maamusho, oo ay ku jiraan dawladaha hoose, dawlad goboleedyada, degmooyinka gobolka, iyo;

- Ururada mudnaantoodu tahay dhaqdhaqaaqyada siyaasadeed ee taageeraya ama ka soo horjeeda xisbi kasta oo siyaasadeed, wakiil la doortay, ama musharax xafiis dadweyne.



Funded in part by the Government of Canada's Black-Led Philanthropic Endowment Fund | Canada

## Waxqabadyada Guud ee U-qalmitaan La'aanta

Fadlan ogsoonow in deeq kastaa ay leedahay waxqabadyo dheeraad ah oo ku saabsan u-qalmitaan la'aanta. Waxqabadyada soo socdaa uma qalmaan deeqaha FFBC:

- maalgelinta khasaaryaasha;
- iibsashada ama iibinta khamriga ama xashiishadda, maalgelinta shatiyada ama ogolaanshiyayaasha la xidhiidha, ama dayactirada raasumaalka ama dayactirada xarumaha ama goobo loo isticmaalo ujeedo ku saabsan iibinta khamriga ama xashiishadda;
- dhaqdhaqaaqyada siyaasadeed ee taageeraya ama ka soo horjeeda xisbi kasta oo siyaasadeed, wakiil la doortay, ama musharax xafiis dadweyne;
- waxqabadyada diiniga ah ama ay ku jiraan shuruudo lagu xidho ka qaybqaadashada nooc kasta oo caqiido ah (tusaale: kaniisad maamulaysa cunto-karin bulsheed waxay codsan kartaa saadka iyo kharashka shaqaalaha waana ay u-qalmaan laakiin mudnaantooda koowaad maaha waxqabadyo diimeed );
- dayactirada raasumaalka ama dayactirada dhismooyinka loo isticmaalo ujeedo la xidhiidha muujin ama ku-dhaqan diimeed;
- dhaqaale ururin guud ama olole raasumaal;
- waxqabadyada, barnaamijyada ama adeegyada aan faa'iidada u-lahayn bulshooyinka Madowga ah ee Kanada;
- waxqabadyada, barnaamijyada ama adeegyada laga fuliyo ama lagu bixiyo meel ka baxsan guddaha Kanada, iyo;
- waxqabadyada la dhammaystiray, ama kharashaadyada la geliyay, ka hor taariikhda lagu xusay heshiiska qandaraaska deeqda ee FFBC.



Funded in part by the
Government of Canada's Black-Led
Philanthropic Endowment Fund | Canada

# Agabaynta Bulshooyinka Madow

## Qaybaha Maalgelinta

Deeqaha Black Ideas Grant 2.0, 2024 waxay aqbali doontaa codsiyada ururada B3 ee u qalma kuwaas oo ka kala socda heerar kala duwan oo ku saabsan fulin mashaariiceed ama barnaamijyo kuwaas oo si togan u saameeynaya bulshooyinka Madowga ah. Waxaa jira saddex qaybood oo maalgelineed. Fadlan dooro qaybta maalgelinta ee ka tarjumaysa ururkaaga ama kooxdaada baahidooda hadda, **fadlan la soco in ururkaaga ama kooxdaada loo ogol yahay inay codsadaan kaliya hal deeq**.

**Saddexda qaybood ee maalgelintu waa:**

- **Deeqda Stream Core** oo ah maalgelin dhan ilaa $30,000 si wax loogaga qabto baahiyaha asaasiga ah iyo kuwa hawleed ee aan la xidhiidhin barnaamijyada;
- **Deeqda Catapult Stream** oo loogu talagalay maalgelin dhan ilaa $80,000 si loogu maalgeliyo adeegyo cusub ama loogu ballaariyo barnaamijyada iyo adeegyada hadda jira, iyo;
- **Deeqda Community Spaces Stream** oo ah maalgelin dhan ilaa $200,000 si loogu maalgeliyo mashaariicda raasamaalka ah iyo kaabayaasha bulshada.

# Deeqda Stream Core | ilaa $30,000

## SHARAXAAD

Si loo taageero joogteynta ama jiritaanka muddada dheer iyo shaqaynta ururada codsadayaasha iyadoo la siinayo maalgelinta kharashyada go'an sida kharashka dheeraadka ah [1]iyo kobcinta awooddooda si loo hagaajiyo loona xoojiyo hawlaha ururka.

## UJEEDOOYINKA

Barnaamijka Deeqda Core Grant Stream waxa uu hiigsanayaa in uu gaadho ujeedooyinka soo socda:

- Kobcinta awooda ururka iyo hufnaanta hawleed
- Siinta taageero waarta muddo-dheer hay'adaha ay hoggaamiyaan-Madowgu, U-xilsaaran-Madowga iyo kuwa U-adeega-Madowga
- Xoojinta awoodda ururka iyo hawlaha asaasiga ah

[1] *"Kharashaadka dheeraadka ah" waxa loola jeedaa kharashaadka maamulka iyo kuwa guud ee lagama maarmaanka u ah shaqada ururka laakiin si toos ah uguma xidhna barnaamijyo ama adeegyo gaar ah. Kharashaadyadan waxa ka mid ah kharashyada la xidhiidha maaraynta, lacag ururinta, xisaabaadka, kirada, waxyaabaha aasaasiga ah, agabka xafiisyada, iyo kharashaadyada kale ee guud ee shaqada.*



Funded in part by the Government of Canada's Black-Led Philanthropic Endowment Fund | Canada

- U-oggolaanshiyaha ururada inay si wanaagsan u gaadhaan himiladooda oo ay daboolaan baahiyaha bulshada

## CODSADAYAASHA U-QALMA

- Noqo hay'ad samafal oo diiwaan gashan oo mawqif wanaagsan ka taagan Hay'adda Dakhliga Kanada (CRA), AMA Noqo urur aan faa'iido doon ahayn oo lahaanshiyihiisa lagu buriyay sharciga federaalka ama gobolka AMA mid la Leeyahay oo koox ah ama iskaashato ay hogaamiyaan-madow, u-xilsaaran ama u adeegta madow.
- Inuu noqdo mid Madow-Hogaamiyo, U-xilsaaran-Madow, ama U-adeega-Madow marka la eego dhammaan heerarka ururka, oo ay ku jiraan maamulka iyo hawlgalladaba
    - ◊ Ugu yaraan saddex-meelood laba (2/3) hoggaanka ururka, shaqaalaha iyo guddigu waa in ay isu aqoonsanyihiin inay yihiin Madow
- Soo bandhig baahi cad oo aad u qabto kobcin awoodeed ama taageerada hawlgalada

Ururada iyo kooxaha u-qalmaa waxay codsan karaan ilaa $30,000 si ay wax ugaga qabtaan baahiyaha dhaqaale ee aasaasiga ah. Deeqdani waxay maalgalin doonta hawlaha asaasiga ah ee la xidhiidha guusha hawleed ee ururka ama kooxda.

## NOOCYADA KHARASHAADKA LA OGGOLYAHAY

Kharashaadyada soo socdaa waxay u-qalmaan maalgelinta hoos timaada barnaamijka deeqdan:

- Horumarinada isgaarsiinta
- Nidaamyada maamulka maaliyadda ama tababarka
- Horumarinta awoodda dhaqaale ururinta
- Qalabka xafiisyada iyo qalabyada
- Waxqabadyada kobcinta maamulka
- Kharashaadyada horumarinta xirfadeed
- Kirada iyo adeegyada asaasiga ah
- Habraacyada qorshaynta istiraatijiyadeed
- Tignoolajiyada iyo cusboonaysiinta software-da
- Waxqabadyada kale ee kobcinta awooda (ku xiran oggolaansho)



Funded in part by the
Government of Canada's Black-Led
Philanthropic Endowment Fund | Canada

## NOOCYADA KHARASHAADYADA AAN LA OGGOLAYN

Kharashaadyada soo socda uma qalmaan maalgelinta hoos timaada barnaamijka deeqdan:

- Kharashaadyada balaarinta barnaamijka
- Kharashyada raasumaalka ah (tusaale, iibsashada dhisme, dayactirada waaweyn)
- Deynta hawlgabka ama maalgelinta khasaaraha
- Kharashaadyada la galay ka hor ansixinta ogolaanshaha deeqda
- Dhaqdhaqaaqyo siyaasadeed ama diimeed

**Fiiro Gaar ah:** Kani maaha liis dhamaystiran oo ka turjumaya dhammaan kharashaadyada u-qalma ee la oggolyahay. Deeqdan Core Stream waxaa loogu talagalay **kharashaadyada hawlgelinta guud, ee maaha kharashaadyo la xidhiidha barnaamijyada/bixinta adeegga.**

## Tusaalooyin

- Ururku wuxuu u baahan yahay inuu shaqaaleysiiyo Agaasime Fulineed si uu gacan uga geysto kormeerida hawl-maalmeedka.
- Koox dhalinyaro Madow ah ayaa soo codsatay maalgelinta ay ku shaqaaleysanayaan lataliye si ay u horumariyaan qaab dhismeedka maamulkooda.
- Hay'ad samafal ayaa soo codsatay lacag ay ku iibsato qalab xafiis oo cusub.
- Urur B3 ah ayaa iibsaday nidaam tignoolajiyadeed iyo agab/qalab.

FFBC waxay ku siinaysaa su'aalaha codsiga deeqda oo dhamaystiran si ay kaaga caawiyaan diyaarinta codsigaaga kahor soo gudbintaada kama dambaysta ah ee bogga codsiga. Waxaad isticmaali kartaa su'aalaha si aad horay ugu sii diyaarsato jawaabahaaga, u-ururiso dhammaan dukumeentiyada loo baahan yahay, iyo in aad wax la qorsheysato kooxdaada.

*Su'aalaha Codsiga ee Quseeya Deeqda Core Grant Stream waxa laga heli karaa halkan*



Funded in part by the
Government of Canada's Black-Led
Philanthropic Endowment Fund | Canada

# Deeqda Stream Katapult | ilaa $80,000

## SHARAXAAD

Si loo taageero qaabaynta iyo/ama bixinta mashaariicda[2], barnaamijyada, iyo/ama adeegyada sida tooska ah ay uga faa'iidaystaan bulshooyinka Madow ee Kanada.

## UJEEDOOYINKA

Barnaamijka Deeqda Catapult Stream wuxuu hiigsanayaa inuu gaaro ujeedooyinkan soo socda:

- Taageerida hindisayaasha jira ama kuwa cusub ee wax ka qabanaya baahiyaha gaarka ah ee ka dhex jira bulshooyinka Madow
  - ◊ **Fikrado cusub iyo/ama habab cusub:** Ururada iyo kooxaha dhisaya ama bilaabaya barnaamijyo, mashruucyo ama adeegyo cusub, tijaabinaya habab cusub, wax baadhaya ama tijaabinaya ayaa soo codsan kara deeqdan.
  - ◊ **Balaadhinta barnaamijyada ama adeegyada:** Ururada iyo kooxaha qorsheynaya inay balaariyaan ama sii wadaan barnaamijyo, mashaariico ama adeegyo hadda jira ayaa soo codsan kara deeqdan **.** Ururadu waa inay ku qeexaan barnaamijka ama adeega hadda jira codsigooda.
- Horumarinta nashqadda barnaamijka iyo bixinta adeegga
- Kordhinta helitaanka iyo galaangalka adeegyada bulshada ee khuseeya kuwaas oo horumarinaya:
  - ◊ Xaaladaha dhaqan-dhaqaale
  - ◊ Farshaxanka iyo ka qaybgalka dhaqanka
  - ◊ Caafimaadka iyo fayoqabka
  - ◊ Ka-qaybgalka bulshada
  - ◊ Dadaalka wax lagaga qabanayo cunsuriyadda ka dhanka ah dadka madow

## CODSADAYAASHA U-QALMA

- Noqo hay'ad samafal oo diiwaan gashan oo mawqif wanaagsan ka taagan Hay'adda Dakhliga Kanada (CRA), AMA Noqo urur aan faa'iido doon ahayn oo lahaanshiyihiisa lagu buriyay sharciga federaalka ama gobolka AMA mid ay Leeyihiin koox ama iskaashato.

---

[2] *"Mashruuc" waxa loola jeedaa hindise aan si toos ah u bixin adeeg bulsho balse ku lug leh hawlo ay ka mid yihiin isugu yeedhida koox dad ah si loo horumariyo istaraatijiyad ama qorshe hawleed. Mashruucyada badanaa waxay diiradda saaraan qorsheynta, abaabulka, ama u diyaargarowga dadaallo ama hindisayaal ballaaran .*



Funded in part by the Government of Canada's Black-Led Philanthropic Endowment Fund | Canada

- Inuu noqdo mid Madow-Hogaamiyo, U-xilsaaran-Madow, ama U-adeega-Madow marka la eego dhammaan heerarka ururka, oo ay ku jiraan maamulka iyo hawlgalladaba
- Ugu yaraan saddex-meelood laba (2/3) hoggaanka ururka, shaqaalaha iyo guddigu waa in ay isu aqoonsanyihiin inay yihiin Madow
- Inuu noqdo mid Madoow Hogaamiyo, Madaw-madoow ah, oo Madow u adeega dhammaan heerarka ururka, oo ay ku jiraan maamulka iyo hawlgallada
- Hindisaha la soo jeediyay waa in fadhigiisu yahay gudaha Kanada oo uu u adeegaa bulshooyinka madow ee Kanada
- Soo bandhig isku xidhnaansho cad iyo fahamkaaga bulshooyinka Madow ee ay u adeegaan
- Keen caddayn ku saabsan taageerada bulshada ee loogu talogalay hindisaha la soo jeediyay

Ururada iyo kooxaha u-qalmaa waxay codsan karaan ilaa $80,000 si ay u sahamiyaan fikrado cusub ama kuwo hadda jira ama habab lagu kobcinayo wanaagga dhaqan-dhaqaale ee bulshooyinka Madow, oo ay ka mid yihiin cilmi baaris, naqshadeyn, tijaabo, iyo qiimeynta hindisayaasha.

## NOOCYADA KHARASHAADKA LA OGGOLYAHAY

Kharashaadyada soo socdaa waxay u-qalmaan maalgelinta hoos timaada barnaamijka deeqdan:

- Mushaharka shaqaalaha iyo faa'iidooyinka sida tooska ah ula xiriira hindisaha
- Qalabka iyo agabka barnaamijka
- Qalabka lagama maarmaanka u ah bixinta barnaamijka
- Kirada iyo adeegyada loogu talagalay goobta barnaamijka
- Suuqgeynta iyo kharashaadka wacyigelinta
- Horumarinta xirfadeed ee la xidhiidha hindisaha
- Qiimaynta iyo ka warbixinta kharashaadyada
- Kharashaadyada safarka ee sida tooska ah ula xiriira hirgelinta barnaamijka
- Kharashaadyada maamulka



Funded in part by the
Government of Canada's Black-Led
Philanthropic Endowment Fund | Canada

## NOOCYADA KHARASHAADKA AAN LA OGGOLAYN

Kharashaadyada soo socdaa uma qalmaan maalgelinta hoos timaada barnaamijka deeqdan:

- Kharashaadyada raasumaalka ah (tusaale, iibsashada dhisme, dayactirada waaweyn)
- Deynta hawlgabka ama maalgelinta khasaaraha
- Kharashaadyada la galay ka hor ansixinta ogolaanshaha deeqda
- Dhaqdhaqaaqyada siyaasadeed ama diimeed
- Hindisayaal aan si toos ah faa’iido ugu lahayn bulshooyinka Madow.
- Kharashaadyo ay daboolayeen ilo kale oo maalgelineed

**Fiiro gaar ah:** deeqdan catapult stream waxa **loogu talagalay oo keliya** **kharashaadyada barnaamijka iyo bixinta adeegga (**kharashaadyada maamulka ee barnaamijka la xidhiidha waxa laga yaaba in la daboolo).

## Tusaalooyin

- Hay'ad samafal oo qorshaynaysa inay usoo iibsato talaajad cusub naadi cunto karin oo cusub.
- Urur aan faa'iido doon ahayn ayaa qorsheynaya inuu qabto aqoon-is-weydaarsi ama u sameeyo dhalinyarada xero degsiimeed xagaaga.
- Hay'ad aan faa'iido doon ahayn oo ka shaqeysa dhowr barnaamijyo iyo adeegyo ayaa dooneysa inay soo saarto muuqaallo tayo sare leh oo qayb ka ah istiraatiijiyadeeda isgaarsiineed.
- Bangiga cuntada oo u baahan inay dib u habeyn ku sameeyaan xaruntooda oo uu iibsado baabuur si uu u daboolo baahida macaamiisha waayeelka ah.
- Hoy ayaa u soo iibiyay jaakadaha jiilaalka dhalinyarada gurigooda kala guurka ah.
- Urur B3 ah ayaa sameeyay daraasad ku saabsan suurtogalnimada barnaamij cusub oo madadaalo u noqda dhalinyarada bulshadooda.
- Urur B3 ah oo u adeegga bulshada ayaa qorsheynaya inuu sameeyo cilmi-baaris heersare ah oo saameeynaysa shaqaalaha muhaajiriinta ah ee Madow.
- Urur-bulsheed ayaa qiimayn adag ku sameynaya barnaamij jira.



Funded in part by the
Government of Canada’s Black-Led
Philanthropic Endowment Fund | Canada

- Koox ka mid ah waalidiinta Madowga ah ayaa waxa ay jeclaan lahaayeen inay u-kuur galaan abuurista ururada aan faa'iido doonka ahayn si ay u taageeraan haqab-beelka cuntada ee Odayaasha Madowga ee bulshada dhexdeeda.

FFBC waxay ku siinaysaa su'aalaha codsiga deeqda oo dhamaystiran si ay kaaga caawiyaan diyaarinta codsigaaga kahor soo gudbintaada kama dambaysta ah ee bogga codsiga. Waxaad isticmaali kartaa su'aalaha si aad horay ugu sii diyaarsato jawaabahaaga, u-ururiso dhammaan dukumeentiyada loo baahan yahay, iyo in aad wax la qorsheysato kooxdaada.

*Su'aalaha Codsiga ee Quseeya Deeqda Catapult Stream waxa laga heli karaa halkan*

# Deeqda Community Spaces Stream | ilaa $200,000

## SHARAXAAD

Si loo taageero iibsiga, dhismaha, dib-u-cusboonaysiinta, iyo dayactirka meelaha bannaan ee bulshada [3]iyo meelaha la isugu yimaado ee sida tooska ah ay uga faa'iidaystaan ama u adeega bulshooyinka Madow ee Kanada.

## UJEEDOOYINKA

Deeqda Community Spaces Grant Stream waxay hiigsanaysaa in ay gaadho ujeedooyinka soo socda iyada oo gacan ka geysanaysa kordhinta jiritaanka, waaritaanka iyo/ama galaangalka Goobaha Bulshada taas oo ay hogaamiyaan-Madawgu, leeyihiin oo ay maamushaan:

- Kobcinta Dareenka Lahaanshaha iyo Isku Xidhka
- Kobcinta caafimaadka bulshada iyo fayoqabka
- Taageeridda Is-dhexgalka Dhaqaalaha iyo Bulshada

## CODSADAYAASHA U-QALMA

- Noqo hay'ad samafal oo diiwaan gashan oo mawqif wanaagsan ka taagan Hay'adda Dakhliga Kanada (CRA), AMA Noqo urur aan faa'iido doon ahayn oo lahaanshiyihiisa lagu buriyay sharciga federaalka ama gobolka
- Inuu noqdo mid Madow-Hogaamiyo, U-xilsaaran-Madow, ama U-adeega-Madow marka la eego dhammaan heerarka ururka, oo ay ku jiraan maamulka iyo

[3] *" Meelaha bannaan ee bulshada" waxaa loola jeedaa aag, dhisme, ama xarun la qoondeeyay halkaas oo xubnaha bulshada Madowga ah ee deegaanku ay ku kulmi karaan, isku dhex geli karaan, oo ay ku qaban karaan hawlo kala duwan. Meeshaasi Waxay u adeegtaa sidii xudunta bulshada, dhaqanka, waxbarashada, ama ujeedooyinka madadaalada, kobcinta isku xidhka, wada shaqaynta, iyo ka-qaybgalka bulshada dhexdeeda. "*



Funded in part by the Government of Canada's Black-Led Philanthropic Endowment Fund | Canada

hawlgalladaba. Ugu yaraan saddex-meelood laba (2/3) hoggaanka ururka, shaqaalaha iyo guddigu waa in ay isu aqoonsanyihiin inay yihiin Madow

- Mashaariicda la soo jeediyay waa inay ku yaalaan gudaha Kanada oo ay u adeegaan bulshada Madow ee Kanada
- Waa in ay ka dhex shaqaynaysay Kanada ugu yaraan saddex (3) sano kahor taariikhda codsiga
- Waa in ay keento xisaab xidh ay soo saartay cid ka baxsan gudahooda oo ah kii sannadkii (1) la soo dhaafay. Xisaab xidhka maaliyadeed ee la aqbali karo waxaa ka mid ah bayaan baadhis xisaabeed ama ogeysiis ku socda akhristaha warbixinnada
- Soo bandhig xiriir cad iyo fahamkaaga bulshooyinka Madow ee ay u adeegaan.
- Keen caddayn ku saabsan taageerada bulshada ee mashruuca la soo jeediyay.
- In aad awood u leedahay inaad keento caddayn lahaanshiyo ama heshiis kiro oo muddo-dheer ah

Ururada iyo kooxaha u-qalma ee haya fikrad geesinimo oo weyn oo ku saabsan horumarinta kaabayaasha bulsho iyo dhaqaale ee faa'iidada u leh bulshooyinka Madow. Ururadu waxay codsan karaan ilaa $200,000 si ay u cabbiraan barnaamijyada, adeegyada ama hindisayaasha ganacsi. Maalgelinta waxaa loogu talagalay in lagu maalgeliyo hay'adaha aan looga maarmin waaxdooda ama bulshadooda, si ay gacan uga geystaan nidaam deegaan oo xooggan oo loogu talagalay bulshooyinka Madow, iyo gogol xaadhka isbeddel natiijo leh.

## NOOCYADA KHARASHAADKA LA OGGOLYAHAY

- Kharashaadyada soo socdaa waxay u-qalmaan maalgelinta hoos timaada barnaamijka deeqdan:
- Lahaanshiyaha hanti ama goobo sida iibsashada dhul ama dhismayaal hore u jiray
- Kharashaadyada sharciga ah iyo kharashaadada xidhitaanka ee sida tooska ah u la xidhiidha hanti la wareegidda
- Dhismaha iyo dib u habeynta. Dhisme cusub oo ay bulshadu-leedahay ama meelo ay bulshadu-maamusho
- Dib u cusboonaysiinta ama balaadhinta goobaha la leeyahay ama kuwa muddada dheer la kireystay
- Kharashaadada dhismaha iyo injineernimada
- Ogolaanshaha dhismaha iyo kharashyada la xidhiidha



Funded in part by the Government of Canada's Black-Led Philanthropic Endowment Fund | Canada

- Qalabka iyo shaqaalaha loogu talogalay dhismaha ama dayactirka
- Casriyeynta gelitaanka:
    - ◊ Samaynta jaranjarooyinka, wiishashka, ama liftiyada
    - ◊ Wax ka beddelka musqulaha, albaabbada, ama meelaha kale ee loogu talogalay gelitaanka
    - ◊ hagaajinta calaamadaynta iyo hab-tilmaameedka waddooyinka
- Qalabka iyo alaabta:
    - ◊ Iibka qalabka lagama maarmaanka u ah hawlaha goobta bulshada
- Alaabooyinka iyo agabka sida tooska ah ula xiriira shaqada goobta bulshada
- Kharashaadada hawlgalka (oo ku xaddidan boqolkiiba labaatan iyo shan (25%) wadarta guud ee deeqda):
    - ◊ Adeegyada iyo dayactirka sanadka ugu horeeya ee shaqada
    - ◊ Mushaharka shaqaalaha sida tooska ah ula xiriira maamulka xarunta
- Kharashaadka caymiska ee xarunta
- Khidmadaha maaraynta mashruuca [oo ku xaddidan boqolkiiba toban (10%) wadarta guud ee deeqda] oo si toos ah ula xidhiidha dhismaha, dib-u-cusboonaysiinta ama hawlgalka goobta bulshada

## NOOCYADA KHARASHAADKA AAN LA OGGOLAYN

Kharashyada soo socda uma qalmaan maalgelinta hoos timaada barnaamijka deeqdan:

- Adeegyada la-talinta ee la xidhiidha qorshaynta goobta iyo ka-qaybgalka bulshada
- Kharashyada raasumaalka ah ee la galay ka hor ansixinta Maalgelinta Dhismaha Bulshada – Codsiga deeqda Capital stream grant
- Qalabyada aan la rakibin
- Kharash kasta oo ay dabooli jirtey il kale oo maalgelineed
- Waxqabadyada Diinta ama Siyaasadda

**Fiiro gaar ah:** Ururadu waa in ay ku soo bandhigaan hindisaha iyaga oo adeegsanaya suurtogalnimada / baahida / qiimaynta suurtagalka ah ama hab la mid ah si ay u



Funded in part by the Government of Canada's Black-Led Philanthropic Endowment Fund | Canada

muujiyaan in habku shaqaynayo, la balaadhin karo, oo uu yeelan karo awood dib loogu dhalan rogi karo.

**Tusaalooyin**

- Urur B3 ah ayaa wuxuu codsaday maalgelin si loo hormariyo qorshayaasha lagu dhisayo guri daryeel oo waqti dheer shaqeeya oo loogu talagalay waayeelka Madowga ah.
- Urur aan faa'iido doon ahayn oo uu hogaamiyo-Madoow ayaa raadinaya maalgelin ay ku iibsadaan oo ay dib ugu cusboonaysiiyaan dhismayaal si ay u abuuraan goob bulsho oo diirada saarta kobcinta dhalinyarada Madowga ah.
- Urur-bulsheed ayaa codsaday maalgelin dib loogu cusboonaysiinayo goobo la kiraystay oo laga dhigayo iskaashatooyin cunto si ay u noqoto goob isdhexgal iyo goob suuq oo loogu talagalay beeralayda Madow iyo kuwa cuntada iibiya ee deegaanka.
- Urur-bulsheed ayaa codsaday maalgelin si loo horumariyo hindise ku saabsan guriyeyn la awoodi karo qiimahooda.
- Koox ka mid ah ururada haweenka udub dhexaadka ah ayaa waxay isticmaaleen maalgelin si ay dib ugu habeeyaan xarun taas oo bixinaysa nidaam isku dhafan oo dhaqan celin badan leh oo loogu talagalay badbaadayaasha ka ganacsiga/faa'iidaysiga dadka.
- Urur B3 ah ayaa wuxuu bixiyaa taageero la xidhiidha kaabayaasha muhaajiriinta iyo abaabulka qaxootiga iyo dhisidda dhaqdhaqaaq caddaaladeed.
- Urur aan faa'iido doon ahayn oo fadhigiisu yahay miyiga ama waqooyiga ayaa u furi doona goob wada shaqayneed uu ugu talogalay inay waddaagaan ganacsatada Madowga ah, ganacsiyada yaryar, iyo shakhsiyaadka iskood u shaqeysta.

FFBC waxay ku siinaysaa su'aalaha codsiga deeqda oo dhamaystiran si ay kaaga caawiyaan diyaarinta codsigaaga kahor soo gudbintaada kama dambaysta ah ee bogga codsiga. Waxaad isticmaali kartaa su'aalaha si aad horay ugu sii diyaarsato jawaabahaaga, u-ururiso dhammaan dukumeentiyada loo baahan yahay, iyo in aad wax la qorsheysato kooxdaada.

*Su'aalaha Codsiga ee Quseeya Deeqda Community Spaces Grant Stream waxa laga heli karaa halkan*



Funded in part by the Government of Canada's Black-Led Philanthropic Endowment Fund | Canada

# Habka Xulashada

Dhammaan codsiyada ururada u-qalma waxaa dib u eegi doona oo dooran doona xubno ka tirsan bulshada Madow. Hay'adaha u-qalma waxaa ka mid ah hay'adaha samafalka iyo kuwa aan faa'iido doonka ahayn ee Madowgu-hogaamiye, u-xilsaaran-madawga, iyo kuwa Madowga-u-adeega ee Kanada. Dhammaan codsadayaashu waxay heli doonaan ogeysiinta natiijada codsigooda Febraayo 2025.

## Wareegyada Xulashada Bulshada

Codsiyada waxaa kala xuli doona Wareegyada Xulashada Bulshada, kuwaas oo samayn doona talooyinka maalgelinta ee heerarka kale ee xulashada ilaa iyo Guddiga Maamulka ee FFBC. Wareegyada Xulashada Bulshadu waxay ka koobnaan doonaan xubno ka tirsan bulshada Madow ee ballaadhan. Habkan ka qaybqaadashadu waxay ujeedadiisu tahay in la isku xidho bulshooyinka, la maalgeliyo barnaamijyada iyo hoggaamiyayaasha sida dhow ula shaqeeya bulshooyinka la aqoonsaday, dhisidda iyo xoojinta kalsoonida, iyo taageeridda isbeddel-samaynta bulshada ku salaysan ee u adeega bulshada-Madowga ah.

## Shuruudaha Xulashada

Go'aannada waxaa la gaari doonaa iyadoo lagu salaynayo heerka hindisaha ay soo jeediyeen ururada B3 ah ee u-qalma:

- Buuxi shuruudaha u-qalmitaanka ee hindisayaasha adigoo
    - ◊ wax ka qabanaya ugu yaraan mid ka mid ah saddexda Goobood ee diiradda la saaray
    - ◊ wax ka qabashada mid ama in ka badan oo ah Yoolalka Horumarin Waarta iyo Go'aamiyayaasha Bulshada ee Caafimaadka
    - ◊ hubinta in hindisaha lagu fuliyo wakhtiga la soo jeediyay iyo maalgelinta la hayo
    - ◊ aanay ku jirin mid ka mid ah waxqabadyada u-qalmitaan la'aanta.
- In aad ka haysato natiijo wanaagsan bulshooyinka Madowga ee Kanada.



Funded in part by the Government of Canada's Black-Led Philanthropic Endowment Fund | Canada

# Shuruudaha Warbixinta

Ururada loo ogolaaday maalgelintu waa inay saxeexaan Heshiis Maalgalineed ka hor intaysan helin lacag bixinta deeqda. Sida ku cad heshiiska maalgelinta, qaatayaashu waa inay ka qaybqaataan laba marxaladood oo warbixineed. Hadafkayagu waa inaan awoodno inaan sii wadno inaan wax ka barano deeq-qaatayaasha, iskaashiga bridge and build, taageerada bulshooyinka iyo dib u habeynta habka maalgelinta.

1. **Warbixinta muddada dhexe:** Kala badh markuu marayo hindisuhu, deeq-qaataha waxa la waydiin doonaa inay buuxiyaan warbixinta ku-meel-gaadhka ah ee muddada-dhexe (labadaba warbixin odhaah ah iyo mid maaliyadeed) ee hindisahooda. Tani waxay noqon kartaa qaab casriyayn heer sare ah, laguna ogaanayo caqabadaha iyo guulaaha ilaa hadda la wajahay ama la gaadhay. Waxaa jiri doonta fursad aad warbixintan ku bixin doonto hadal ahaan, shaqaalaha FFBC ayaa la xiriiri doona deeq-qaatayaasha si ay u weydiiyaan dookhooda iyo jadwalka ku habboon.
2. **Warbixinta kama dambaysta ah:** marka mashruuca ay u dhamaato hawlihiisa la maalgeliyay, ama ugu dambayn March 31, 2026, deeq-qaatayaasha waxaa la waydiin doonaa inay dhamaystiraan warbixinta kama dambaysta iyago ku warbixinaya (labadaba qaab warbixin ah iyo mid maaliyadeedba) oo ku saabsan hindisayaashoodii.

Macluumaadka lagu soo ururiyey warbixinnadan waxaa laga yaabaa in lala wadaago dawladda Kanada ama loo isticmaalo shaqada Foundation for Black Communities. Fadlan ogow in FFBC aysan la wadaagi doonin wax macluumaad shakhsi ah Dowladda Kanada.



Funded in part by the
Government of Canada's Black-Led
Philanthropic Endowment Fund
Canada

# Sida loo Codsado

Waxaanu ku dhiirigelinaynaa codsadayaasha xiiseynaya inay marka hore si taxadar leh u akhriyaan hagahan iyo sidoo kale su'aalaha codsiga ee laga heli karo halkan . Waxaa lagugula talinayaa inaad codsigaaga u diyaariso qaab oflayn ah marka koowaad ka hor inta aanad jawaabahaaga u gudbin bogga codsiga. Markaad diyaar u tahay inaad codsato, fadlan buuxi oo ku soo gudbi codsigaaga boggayaga codsiga onlaynka ah. Codsiga waxa lagu heli karaa qaabab kala duwan mareegta dhexdeeda, waxaana kuu soo jeedineynaa inaad sii tafatirato jawaabahaaga oo aad isu sii aruuriso dhammaan lifaaqyada ka hor inta aadan gelin codsigaaga bogga internetka. Waad kaydsan kartaa oo dib u eegi kartaa jawaabahaaga ka hor inta aanad gudbin codsigaaga.

Codsiga waxaa lagu heli karaa Faransiis iyo Ingiriisi labadaba.

Waxaan siineynaa boosas xaddidan codsadayaasha looga baahan yahay inay soo gudbiyaan codsi odhaaheed afka ah. Haddii tani ay tahay mid ku xiiso gelisay, waa inaad qabsataa codsi odhaaheed afka ah ama soo gudbintaada dib looma eegi doono. Boosaska waxaa la heli karaa inta u dhaxaysa ***Oktoobar 28 iyo Noofambar 8, 2024.***

Haddii, sabab kale awgeed, aadan awoodin inaad ku soo gudbiso codsigaaga bogga internetka, fadlan kala xidhiidh shaqaalaha FFBC Grants@forblackcommunities.org ka hor wakhtiga kama dambaysta ah ee codsiga. Waanu ku taageeri doonaa intii karaankayaga ah.

Waxaad isku diwaangelin kartaa fadhiyada macluumaadka ee taariikhaha soo socda:

- Seminaar Fogaan-arag ah oo ku baxaya Ingiriisi: Oktoobar 8, 2024 at (INSERT LINK)
- Seminaar Fogaan-arag ah oo ku baxaya Faransiis: Oktoobar 9, 2024 at (geli LINK)

Haddii aad dareento inaad u baahan tahay fadhi tababar oo gaar ah; waxaad ballan ka qabsan kartaa wicitaanka tabobarka mid ka mid ah maamulayaasha barnaamijka. Kulamada tababarka ayaa la heli doonaa inta lagu jiro **Oktoobar 10 ilaa Oktoobar 25, 2024.**

**Codsiyadu waxay furan yihiin Oktoobar 1, 2024, waana in la soo gudbiyaa ka hor Noofembar 8, 2024, 11:59 PM PT.**



Funded in part by the
Government of Canada's Black-Led
Philanthropic Endowment Fund | Canada

# Jadwalka waqtiga

| | |
|---|---|
| **Codsigu Wuxuu Furmayaa** | **Oktoobar 1 , 2024** |
| **Codsiga Wuxuu Xidhmayaa** | **Noofambar 8 , 2024, saacada 11:59 PM PT** |
| Codsiyada Waxa Dib Loo Eegayaa | Noofambar 2024 - Janaayo 2025 |
| Codsadayaasha Waxa La Ogeysiin Doonaa | Febraayo 202 5 |
| Deeqaha Waxa La Bixin Doonaa | Maarso 202 5 |
| Muddada Fulinta | Abriil 1, 2025, illaa Maarso 31, 2026 |



Funded in part by the
Government of Canada's Black-Led
Philanthropic Endowment Fund | Canada